Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

Farriintan waxaa la soo galiyay onlaynka iyadoo ku qoran اللغة العربية, English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

Janaayo 19, 2024

Ku socoto: Xubnaha bulshada I/DD, iskaashatada Qabiileed iyo shaqaalaha Xafiiska Adeegyada Korrinka Naafada ODDS
Ka socoto: Anna S.Lansky, Agaasimaha Kumeelgaarka ah, Xafiiska Adeegyada Korriinka Naafada (ODDS)
Mawduuca: Cusboonaysiinta Sharciga 91-aad ee Aqalka Sare — Soo gudbinta Cafiska Baahiyaha Xad dhaafka ah ee Carruurta

ODDS waxay todobaadkan u gudbisay Xarumaha adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) ee Cafiska Baahiyaha Xad dhaafka ah ee Carruurta. Marka la ansixiyo, cafiska wuxuu noo ogolaan doonaa inaan hirgelino Sharciga 91-aad ee Aqalka Sare. Sharcigu wuxuu na farayaa inay ogolaanshaha dawladda dhexe u raadiyaan barnaamijka joogtada ah si mushahar lacag loogu siiyo waalidka ka daryeel-bixiyeyaal ahaan. Barnaamijkan waxaa loogu talagalay carruurta yaryar ee la qiimeeyay inay qabaan baahiyo caafimaad iyo kuwo habdhaqameed oo aad u sarreeya. Waxay carruurtan iyo qoysaskooda siin doontaa taageero lagama maarmaan ah.

Waad ku mahadsantahay, dhammaan intii ra'yi-celinta ku soo wadaagtay cafiska qabyo-qoraalka. Shaqaalaha ODDS iyo aniguba waan idiinka mahadcelinaynaa soo jeedintiina, fikradahiina iyo khibradahiina shakhsiyneed. Waxaad noo sheegtay dib u eegisteena codsiga. Waxaan soo koobitaanka ku soo darnay faallooyinkaaga iyo jawaabaheena codsiga cafiska oo buuxa. Soo koobitaanka waxaa ku jira sababta aan u qaadanay ama aan u qaadan weynay fikradahaaga.

**Go'aamo dhawr ah oo ka soo baxay hannaankan:**

- Markaan helnay codsi ka yimid faalleeyayaal badan, waxaan codsiga dib ugu darnay ka reebista dakhliga waalidka.
- Waxaan sidoo kale shuruudaha u qalmitaanka ka saarnay baahida loo qabo in la diiwaangeliyo helitaan la'aanta ilmaha ee bixiyeyaasha.
- Waxaanu furka ka dhignay 20 saacadood todobaadkii, ilmo kasta. Dad badan ayaa codsaday in loo beddelo 40 saacadood. Waxaanu ka dhignay 20 saacadood si aanu u labanlaabno tirada carruurta barnaamijkani ugu adeegi karo wax ku habboon miisaaniyadiisa.
- Sababo la xiriira miisaaniyada xaddidan ee barnaamijka awgeed, waxaan fileynaa inaan helno codsadayaal intaa ka badan marka loo eego booska barnaamijka. Waxaan ilmo kasta oo marka hore soo codsada si aan kala sooc lahayn ugu meelayn doonnaa lambar. Carruurta aan boos ka helin barnaamijka waxaa dalabkooda hore lagu ku hayn doonaa liiska sugitaanka. Haddii ay u qalmaan, waxay weli heli doonaan bixiyeyaasha aan waalidka ahayn iyada oo loo marayo Qorshaha K iyo cafisyada kale. Marka boosasku furmaan, ilmaha ugu horreeya ee ku jira liiska sugitaanka wuxuu yeelan doonaa ikhtiyaar uu ku galo barnaamijka, haddii uu u qalmo. Marka

codsadayaasha cusubi rabaan inay soo galaan barnaamijka, waxaan ku dari doonnaa dhammaadka liiska sugitaanka.

**Khayraadka/Ilaha**

- Soo koobitaanka buuxa ee faallooyinka dadwaynaha ee ku saabsan codsiga qabyada ah iyo jawaabaha ODDS
    - Af Carabi, Af Ingiriis, Af Ruush, Af Shiineys La Fududeyay, Af Soomaali, Af Isbaanish, Af Fiyatnaamiis
- Codsiga cafiska kama dambaysta ah (ku qoran Af Ingiriis)
- Soo koobidda cafiska qabyada ah iyo barnaamijka la soo jeediyay
    - Ingiriis | اللغة العربية (Carabi) | Русский (Ruush) | Soomaali (Somali) | Español (Isbaanish) | 简体中文 (Shiineys La Fududeyay) | Tiếng Việt (Fiyatnaamiis)

Haddii aad u baahantahay luqad ama naqshad kale, fadlan iimayl noogu soo dir barta odds.waivers@odhsoha.oregon.gov.

**Tallaabooyinka xigga**

Haddii ay wax walba u dhacaan sidii loo qorsheeyay, waxaanu filaynaa jadwalkan:

- Janaayo 2024: CMS waxay bilaabeysaa inay dib u eegto codsigeenna. Waxaan filaynaa ogolaanshaha inta lagu jiro qeybta hore ee sannadka.
- Gu'ga 2024: Sharci-samaynta.
- Maajo–Juun 2024: Tababarrada ku aaddan hay'adaha maareynta kiisaska, bixiyeyaasha waalidka iyo carruurta ku jirta barnaamijka
- Luulyo 2024: Haddii wax walba ay u dhacaan sidii la qorsheeyay, waxaan rajeyneynaa inaan bilowno barnaamijka.

Wixii macluumaad intaas ka dheer, waxaad tagtaa barta mareegta ee Sharciga 91-aad ee Aqalka Sare.

Waad ku mahadsantahay mar kale ra'yi celintaada. Waxaan rajeyneynaa inaan qaar badan oo idinka idinka mid ah kala shaqeyno mashruucan.

Daacadnimo,



Anna S. Lansky
Agaasimaha Kumeelgaarka ah
Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka

Farriimihii Hore ee Agaasimaha Xafiiska Adeegyada Korriinka Naafada waxaa laga heli karaa barta https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm.

Nagala soco barta aanu ku leeynahay Facebook @oregonDHS.IDD oo baar mareegteena.

Waxaad ku heli kartaa dhukumeentigaan luuqado kale, daabacaad qoraal ballaaran ku qoran, qoraalka indhoolayaasha ama naqshada aad jeceshahay. Kala xiriir ODDS-ta Oregon 503-945-5811. Waxaanu aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka Dhegoolaha ah, kuwa Dhagaha Culus, kuwa Dhegaha-Indhaha la', kuwa aragga la' ama araggoodu hooseeyo. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku

saabsan bixiyayaasha adeegga gudbinta booqo https://www.oregonrelay.com ama https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers.